

MAGAALADA PORTLAND

BARNAAMIYADA GARGAARKA DAYNTA IYO DEEQDA GANACSIYADA EE COVID-19

Barnaamijyada Magaalada Portland ee gargaarka daynta iyo deeqda ganacsiyada waxa loogu talagalay inuu ka kaalmeeyo ganacsiyada magaalada Portland ee ay saamaysay COVID-19. Waxa kuwaas ka mid ah ganacsiyada furan, ama kuwa shaqada ka fariisiiyey qaar ka mid ah ama dhammaan shaqaalahooda iyo/ama ganacsiyada isu diyaarinaya in dib loo furo. Dhaqaalaha la hayo looguma talogelin in baddalkeeda galo dhaqaalaha COVID-19 ee dowladda dhexe iyo

Sideen u codsadaa?

- Codsiga iyo warbixin dheeraad ahba waxa laga heli karaa: www.edd.portlandmaine.gov
- Haddii aad wax su'aal ah qabto, la xirii edd@portlandmaine.gov

Barnaamijyadeen codsaddaa?

Si aad u go'aansato barnaamijyada kugu habboon, marka hore go'aanso inta qof ee shaqaale buuxa (FTE)* ah ee kuu shaqeynaayey Janaayo 31, 2020

- 0-1 shaqaale - Microenterprises Grant
 - Deeq gaarraysa ilaa \$2, 500
 - Hantiiluhu waa inuu yahay dadka dhaqaalaha hooseeya/dhexdhexaadka ah**
- 2-8 shaqaale - Rapid Response Microloan (Deynta Yar ee Dagdagga ah)
 - Deyn gaarraysa ilaa \$10, 000 oo 0% dulsaar leh ilaa 2 sano, dayn celintu waxay bilaabanaysaa 6 bilood ka dib marka la saxeeexo
 - Ilaa \$5, 000 waa la cafiyi karaa haddii dib loo shaqaaleeyo/la reebo 50% shaqaalaha
 - < \$1 milyan oo beecshiro ah
- 2+ shaqaale- COVID-19 Gargaarka Ganacsatada (BAP) ee dib u shaqaalaysiinta
 - Deeq gaarraysa ilaa \$5, 000
 - Dib loo shaqaaleeyo 2 ama in ka badan oo ah shaqaale buuxa
 - Shaqaaluhu waa inay yihiin dadka dakhliga hooseeya/dhexdhexaadka ah**

Haddii ganacsigaagu uudan ku oollin Portland laakiinse uu ku yaallo degmada Cumberland, waxad codsan kartaa GPCOG Rapid Response Program (Deeqda Dagdagga ah)

<https://www.gpcog.org/410/Micro-loan-program>

Qeexdimoo

*1 FTE (shaqaale buuxa) wuxu la mid yahay ugu yaraan 34 saac/todobaadkii ama 2 shaqaale xilli dhiman oo midkiiba leeyahay 17 saac/todobaadkii ugu yaraan

**dakhli hoose/dhexdhexaad ah waxa lagu qeexaa 80% celceliska dakhliga qoyska dhexdhexaadka ah ee qiyaasta Wasaaradda Guriyeynta iyo Horumarinta Magaalooyinka. Jaantus muujinaya dakhliga la oggolyahay waxaad ka heli doontaa website ka hoos ku qoran:<http://www.portlandmaine.gov/DocumentCenter/Home/View/8939>

ta gobolka

Maxaan dhaqaalahan u isticmaali karaa?

- Raasmaalka aad ku shaqayso (sida, kiro, adeeg, mushahar, caymis) insurance, inventory);
- Iyo waxyaabo kale iyadoo ku xiran hadba barnaamijka
- Dayn hore oo lagu bixiyo;
- Hormaris dayn cusub;
- Lacagta hantiiluhu iskama qaadan karo;
- Waxa jira waxyaabo kale oo mamnuuc ah

Maxaan u baahan doonaa si aan u codsado?

- Waa inaad arjigaaga soo raaciso sharciyada ay ka mid yihiin:
- Mushaahr bixinta laga soo bilaabo Janaayo 31, 2020 taasoo muujinaysa tirada shaqaalaha buuxa iyo xilliga dhiman
- Hantida shakhsi ahaaneed ee milkiileyaasha leh saami 20% ama in ka badan
- Canshuur celintii 2018 iyo 2019
- Xisaabxirkii 2019 iyo khasaare iyo faa'iido
- Goob ganacsi oo kiro ah, sidoo kale kharashka dayactirka, caymiska iyo canshuurta dhulka
- Foomka 491 ama 990 ee IRS

Maxaa dhacaya markaan codsiga xaraysto

Shaqaaluhu waxay dib u eegi doonaan codsi kasta si ay u habsadaan inuu dhammaystiran yahay. Dayn qaybiye ayaa dib u eegaya, ka dibna warbixin u diyaarinaya Laanta Horumarinta ee Portland (PDC), ee xubinta amaahda bixisa ee Magaalada. PDC waxay dib u eegi doontaa warbixintaas, ka dibna waxay aqbali doontaa codsiga ugu habboon. Dadka arjigooda la aqbalay waxay shaqaalaha magaalada kala shaqayn doonaan saxeexa heshiiska ee barnaamijkan. Daymuhu waxay u baahan yihiin:

- Dammaanaqaad dhammaystiran oo ay bixiyaan dhammaan dadka leh saami 20% ama in ka badan
- Caddaynta Daymaha lagu leeyahay hantida

Wixii faahfaahin dheeraad ah iyo ilo kale oo deegaanka ah, kala soco:
www.edd.portlandmaine.gov



PORTLAND
of Opportunity